



Wasaaradda Qorsheynta iyo
Horumarinta Qaranka



Waaxda Dhexe ee
Istaatistikada Qaranka



Halbeega Qiimaha Maciishadda/Ascaarta iyo Adeega ee billaha ah (HQM)

©CSD2024

September 2024



www.somalilandcsd.org
www.mopnd.govsomaliland.org



@somalilandcsd

Habraaca Xogta

Halbeega Qiimaha Maciishadda/ascaarta iyo adeega (HQM) iyo warbixinta la socota waxaa bil kasta diyaariya Waaxda Istaatistikada Dhexe (CSD) ee Wasaaradda Qorsheynta iyo Horumarinta Qaranka (MoPND). Bishii Jeenaweri ilaa Diseembar 2012 waa xilliga tixraaca qiimaha, taas oo tusmada HQM loo dejiyay 100

Halbeega Qiimaha Maciishadda/Ascaarta iyo adeega (HQM) waxaa lagu soo ururiyaa qiyaastii 520 qiimayaal badeeco oo laga soo qaado Hargeysa, gaar ahaan labada suuq ee ugu waaweyn ee furan. Qiimayaashaas badeecooyinka ayaa lagu miisaamaa iyadoo la adeegsanayo tixraaca isticmaalka oo la xisaabiyo iyadoo la adeegsanayo xogta Sahanka Miisaaniyadda Qoyska ee Somaliland (2013) iyo ilo xog oo dheeraad ah si loo buuxiyo farqiga xogaha.

HQM wuxuu raacayaa heerarka xisaabinta qiimaha. Tusaale ahaan Halbeega Qiimaha Maceeshada & adeega (HQM) waxay raacdaa Kala-soocidda Istimmaalka Shaqsiga ee Ujeedooyinka (COICOP), tusmooyinka heerka hoose waxaa lagu xisaabiyaa iyadoo la adeegsanayo habka celceliska joometeriga (tusmada Jevons), halka tusmooyinka heerarka sare lagu xisaabiyo sidii celceliska miisaaman ee tusmooyinka hoosaadyada (tusmada Laspeyres).

Xogaha taariikhiga ee Halbeega Qiimaha Maceeshada & adeega (HQM) iyo qaybaha ugu waaweyn, sicir-bararka sanadlaha iyo bilaha, iyo faahfaahinta ku saabsan habka xisaabinta waxaa laga heli karaa bogga internetka ee **CSD website: <https://somalilandcsd.org/>**

Soo koobid ku saabsan Halbeega Qiimaha Maciishadda ee Sebtember 2024

Bishan Sep_ 2024, Heerka HQM guud wuxuu hoos u dhacay 0.5% marka la barbardhigo bishii hore, Heerka sicir-baraku waxa sidoo kale hoos u dhacay 9.4% marka la barbardhigo isla bishan sanadkii hore. Shaxda Kowaad ee hoos ku qoran: - wuxuu soo koobayaa isbeddelada bilaha iyo sanadlaha ah ee HQM-ga guud iyo Qaybaha waaweyn ee COICOP


Shaxda kowaad . Isbeddelka bil kasta iyo sannad kasta ee HQM guud iyo qaybaha ugu waaweyn ee COICOP ee Sep. 2024

Code	Qaybaha waweyn	Misaan	Sep_23	Aug_24	Sep_24	Isbadlka bisha Boqolay ahaan	Isbadlka Sanadka Boqolay ahaan
	Tusmada Guud	100%	229.19	249.52	250.69	0.5	9.4
1	Cuntada iyo msharaabka	41.75%	264.60	296.41	298.83	0.8	12.9
1.1	CUNTO	38.71	268.63	300.84	303.25	0.8	12.9
01.1.1	Roodhida iyo Midhaha	10.48	223.54	241.28	245.46	1.7	9.8
01.1.2	Hilibka	6.05	302.54	331.11	337.79	1.7	11.7
01.1.3	Kaluun iyo cunoooyinka Badda	0.37	235.01	259.06	259.06	0.0	10.2
01.1.4	Caano, jiis iyo ukun	4.23	268.13	269.08	269.08	0.0	0.4
01.1.5	Saliid iyo dufan/dux	1.54	221.38	221.49	221.43	0.0	0.0
01.1.6	Midaha	3.26	432.66	488.97	487.71	-0.3	12.7
01.1.7	Khudrada	6.28	262.86	361.52	362.68	0.4	38.0
01.1.8	Sonkor, macaane, malab, shukulaato iyo nacnac	2.53	239.74	252.57	252.57	0.0	5.4
01.1.9	Alaabooyin cunno aan cayimanayn	3.99	250.97	261.52	262.50	0.4	4.6
2	Tubaakada iyo Jaadka	4.56%	297.64	282.89	282.89	0.0	-5.0
3	Dharka iyo kabo	5.73%	217.77	247.13	248.57	0.6	14.1
4	Guriyeynta, biyaha, korontada, gaaska iyo shidaalka kale	14.10%	221.01	226.73	227.06	0.1	2.7
5	Alaabaha guriga iyo qalabka dayactirka guryaha	5.55%	187.45	210.45	210.54	0.0	12.3
6	Caafimaadka	2.56%	216.48	219.52	219.52	0.0	1.4
7	Gaadiidka	8.85%	145.08	153.91	153.91	0.0	6.1
8	Isgaarsiinta	2.99%	192.45	203.03	203.03	0.0	5.5
9	Madadaalo iyo dhaqanka	2.25%	180.82	195.50	195.50	0.0	8.1
10	Waxbarashada	3.69%	159.19	162.85	163.44	0.4	2.7
11	Makhaayadaha iyo hudheelada	3.35%	216.60	248.35	248.45	0.0	14.7
12	Alaabaha kale iyo adeegyada	4.62%	211.36	238.48	238.65	0.1	12.9

Isbeddellada ugu dambeeya ee HQM iyo qaybaha ugu waaweyn

Isbeddelladii ugu dambeeyay ee HQM-ga iyo qeybihiisa ugu waaweyn Kala-soocidda sicir-bararka saddexda qayb ee ku jira Jaantuska Koowaad waxay noo oggolaaneysaa inaan aragno saameynta ku saabsan qiimaha ee dhaqdhaqaaqa qaybaha ugu badan ee isbeddelka ee HQM-ga, waxyaabaha cuntada iyo dalagyada kor u kacay iyo qiimaha Tamarta, Shidaalka iyo Adeegyada kor u kacay. Sidoo kale waxay noo oggolaaneysaa inaan xisaabino "Sicir-bararka Asaasiga ah" adigoo ka jaraya qaybaha isbedelka badan leh, taas oo si sax ah u muujineysa isbeddelka qiimaha guud ee dhaqaalaha oo ku saleysan dalabka iyo sahayda guud.

jaantuuska 1. Sicir-bararka billaha ah iyo qeybihiisa ugu waaweyn, lixdii bilood ee ugu dambeeyay



Heerka sicir-bararka ee lixdii bilood ee u dambeeyay

Muddo lix bilood ah, sicirka sare ee bilaha ayaa si tartiib ah hoos ugu dhacay, ka hor inta aanu ku dhowaanin inuu istaago, Bishii April, sicir-bararku wuxuu sare u kacay 0.6%, halka bishii May uu kor u kacay 0.6%. Bishii Jun 2024, sicir-bararku wuxuu kor u kacay 0.7%, sidoo kale bishii July wuxuu sare u kacay 0.8%, halka bishan August sicir-bararku uu sare u kacay 0.9%, Bisha Seotember isma bedel 0.5%.

Korodhka ugu weyn ee bilaha waxaa lagu cabiraa qaybta "Qudaarta iyo waxyaabaha la xidhiidha." marka laga soo bilaabo Bishii April 2024, sicir-bararku wuxuu sare u kacay 3.4%, halka bishii May uu hoos udhacay 2.7%. Bishii Jun 2024, sicir-bararku wuxuu hoos u dhacay 0.4%, bishii July wuxuu kor u kacay 0.8%, halka bishan August heerka sicir-bararku uu sare u kacay 0.1%, halka uu September aan is bedelin 0.1%.

Dhinaca kale, qaybta "Tamarta, Shidaalka iyo Adeegyada" bil kasta waxay ahayd sidan: bishii April 2024 sicir-bararku uu hoos ugu dhacay 3.6%. Heerka sicir-bararka bishii May

wuxuu sare u kacay 0.9%, halka bishii Jun 2024 sicir-bararku waa isku mid siman 0.9%. Bishii July, sicir-bararku wuxuu joogto ku ahaa 1.7%, halka bishii August sicir-bararku uu sare u kacay 4.0%, waxa uu hoos ugu dhacay bishaha September 0.2%.

Qaybta "Sicir-bararka Asaasiga ah," oo ka tarjumaysa isbeddelka qiimaha badeecadaha la cuntada iyo Alaabooyinka ee ku jira mid ka mid ah labada qaybood ee kale, waxay ahayd tan ugu xasilloonayd saddexda qaybood. heerka sicir-bararka bishii April 2024 waxa uu kor u kacay 0.5%. Bishii May, sicirka sicir-bararku wuxuu hoos u dhacay 0.3%, halka bishii Jun 2024 sicirka sicir-bararku uu kor u kacay 0.1%. Bishii July, Heerka sicir-bararku wuxuu hoos ugu dhacay 0.9%, halka bishan August 2024 sicirka sicir-bararku uu hoos ugu dhacay 0.2%, bishan September wuxu sicir-bararku kor u kacay 0.6%.

Shaxda kowaad. Isbeddelka bilaha boqolkiiba ee guud ahaan HQM iyo qaybaha ugu waaweyn

Qaybaha	2023				2024								
	Sep	Oct	Nov	Dec	Jan	Feb	Mar	Apr	May	Jun	Jul	Aug	Sep
Tusmo guud	0.8	1.1	0.9	1.2	1.2	0.3	0.4	0.6	0.7	0.8	1.0	0.5	0.5
Guud	0.7	0.6	0.3	0.6	0.5	0.8	0.4	0.5	0.3	1.0	0.9	0.2	0.6
Cuntada, dalagyada iyo waxyalaha la xidhiidha	1.8	4.2	4.6	5.5	3.5	-1.9	0.4	3.4	2.7	0.3	1.0	0.1	0.1
Tamarta iyo Shidalka	0.6	0.7	0.0	0.1	2.5	-0.3	0.1	(3.6)	0.9	0.0	1.7	4.0	0.2

Shaxda labaad. Isbeddelka Sanadka boqolkiiba ee guud ahaan HQM iyo qaybaha ugu waaweyn

Qaybaha	2023				2024								
	Sep	Oct	Nov	Dec	Jan	Feb	Mar	Apr	May	Jun	Jul	Aug	Sep
Tusmo guud	7.3	7.7	8.4	9.4	10.2	10.0	9.7	9.6	9.4	9.5	9.9	9.8	9.4
Guud	6.0	5.8	5.8	5.8	5.9	6.5	6.5	6.5	6.4	7.0	7.5	7.0	6.8
Cuntada, Midhaha iyo waxyalaha la xidhiidha	16.2	18.5	23.4	29.8	34.2	31.3	30.3	31.3	30.5	29.6	29.0	28.5	26.3
Tamarta iyo Shidalka	7.0	10.3	10.6	12.7	15.0	11.4	9.4	5.5	4.9	2.3	3.0	6.8	6.4

Sidee loo turjumayaa tirakoobyada sicir-bararka iyo Halbeega Qiimaha maciishadda (HQM)?

Isbeddelka tusmooyinka bil gudaheed waxaa badanaa lagu cabiraa isbeddel ahaan boqolkiiba halkii laga cabiri lahaa isbeddelka dhibcaha tasmada. Tusaale ahaan, haddii tusmo ka mid ah ay ka gudubto 50 bil gudaheed ilaa 55 bisha xigta, tani waxay ka dhigan tahay 10% koror tasmadaas, taas oo badanaa loo soo tebin doono sida sicir-bararka bilaha ah ee 10%.

Shaxda 4. tusaale ahaan sida loo fasiro xidhiidhk ka dhexeeye is badalka tasmada iyo sicir-bararka.

<i>Sicir-bararka billaha ah</i>		<i>Sicir-bararka sanadlaha ah</i>	
Heer Halbeega guud bisha	250.69	Heer Halbeega guud ee bishan	250.69
Ka jar Heerka bishii hore	249.52	Ka jar Heerka bishan, bishedii sanadkii hore	229.19
Farqiga dhibcaha heerarka	1.17	Farqiga dhibcaha Heerarka	21.5
U qaybi Heerka Halbeega guud ee bishii hore	249.52	U qaybi Heer Halbeega guud bishii sanadka hore	229.19
Waxay la mid tahay/leegtahy	0.004689	Waxay la mid tahay/ leegtahay	0.0938086
Natiijada ku dhufo 100	0.004689x100	Natiijada ku dhufo 100	0.0938086x100
Isbedelka Sicir-bararka ee bisha	0.5%	Isbedelka Sicir-bararka ee Sanadka	9.4%

FG: Ilaa Janaayo 2024 waxaa dhacay laba dhacdo oo la xiriira qiimaha; Qiimaha sarifka lacagta Somaliland ee Shilinka Somaliland ayaa kor u kacay todobaadkii ugu horeeyey July iyo bisha Ogost,taasi oo saamaysay qiimihii badeecadaha qaarkood,gaar ahaana Raashinka iyo Cabitaanka. Ta labaad Xiisada aagga siyaasadeed ee marinka bada cas 2024.

Qaybta Cabbitaannada & sharaabada, **Waxbarashadda** iyo Dharka, ee Heerka Sicir bararka ayaa korukacay bishan September 2024, sidoo kale qiimaha tamarta gaar ahaan **Shidaalka** (Tamarta, Shidaalka iyo Utilities) ee bishan September 2024 ayaa hoos udhacay.

Qaamuuska Ereyada

- Xilliga tixraaca tasmada (Jan-Dec 2012=100): Xilliga lala barbardhigo dhammaan xilliyada kale (xilliga qiimaha HQM la dhigayo 100).
- Isbeddelka boqolkiiba: Isbeddelka tasmada ama taxane kale oo tirakoob ah laga bilaabo xilli ilaa xilli kale oo lagu cabirayo boqolkiiba qiimaha uu ahaa xilliga ugu horreeya ee labada xilli.
- Sicir-bararka sanadlaha ah: Isbeddelka boqolkiiba ee u dhexeeya tirada tasmada hadda ee bil gaar ah iyo tirada tasmada ee isla bilahaas sanadkii hore.
- Sicir-bararka bilaha ah: Isbeddelka boqolkiiba ee u dhexeeya tirada tasmada hadda ee bil gaar ah iyo tirada tasmada ee bishii hore.
- COICOP: Kala soocida isticmaalka gaarka ah ee ujeedada, oo kooban COICOP, waa kala soocid ay horumarisay Waaxda Tirakoobyada Qaramada Midoobay si loo kala sooco loona falanqeeyo kharashyada isticmaalka gaarka ah ee ay ku bixiyaan qoysaska, hay'adaha aan macaash doonka ahayn ee u adeega qoysaska iyo dawladda guud ahaan iyada oo loo eegayo ujeedadooda.

